**Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya**
**Dowlad Goboleedka Hirshabeelle**
**Xafiiska Madaxweynaha**

جمهورية الصومال الفيدرالية
حكومة إقليم هير شبيلي
مكتب الرئيس

**Federal Republic of Somalia**
**Hirshabelle State**
**Office of the President**

**Ref: DGHSH/XMM/224/018** **Tr: 23/10/2018**

## XEER MADAXWEYNE Lr 006

Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Hirshabeele

**Markii uu arkay**: qodobka 51aad farqadiisa 12aad ee Dastuurka Dowlad Goboleedka Hirshabeele.

**Markii uu arkay**: baahida loo qabo in la helo sharciyo iyo xeerar lagu Maamulo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dowlad Goboleedka Hirshabeele.

**Markii uu arkay:** qaraarka Baarlamaanka uu soo saaray 21/10/2018 ee uu tirsigiisu yahay **GSHDDGHSH/006/18**

Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Hirshabeele waxa uu xeeriyey in qaraarka baarlamaanka ee

1. Sharciga Guddiga Madaxabanaan ee Shaqaalaha Rayidka, ee Dowlad Goboleedka Hirshabeele.

loo bedelo xeer madaxweyne maanta oo ay taariikhda tahay 23/10/2018
xeer lamber__________

**Maxamed Cabdi Waare**
**Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Hirshabeele**

Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya
Dowlad Goboleedka Hirshabelle
fiiska Guddoomiyaha Baarlamaanka Dowlad Goboledka Hirshabeelle

جمهورية الصومال الفيدرالية
ولايةاقليم هرشبيلي
مكتب رئيس مجلس النواب هرشبيلي

Federal Republic of Somalia
Hirshabelle State
Office of the speaker

Ref: DGHSH /XGB/ 176/18: الرقم

Jowhar, 21th October 21, 2018 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Dowlad Goboledka Hirshabelle =Jowhar=

OG: Madaxweyne Kuxigenka Dowlad Goboledka Hirshabelle =Jowhar=

OG: Wasiirka Shaqada iyo arrimaha Bulshada DG Hirshabelle =Jowhar=

OG:Guddiga Shaqada iyo Shaqalaha BDGHSH =Jowhar=

OG:Xoghayaha Guud ee Golaha Sharci Dejeinta Hirshabelle =Jowhar=

Ujeedo :-ANSIXINTA SHARCIGA Guddiga Madaxa Bannaan shaqalaha rayidka 2018 (Sharci lamber 6)

**Mudane Madaxweyne**

Waxaan kugu wargelinayaa inuu Golaha sharci dejinta Dowlad Goboledka Hirshabelle go'aan ka gaaray Ansixinta Hindise sharciyeedka Guddiga Madaxa-Bannaan ee Shaqalaha Rayidka Hirshabelle oo halkaan ku lifaaqan, wuxuuna Golaha Kalfadhigii 4aad Fadhigiisa 18aad Taarikhdu marka ay aheyd 21/oktober/2018 oo kadhacay Xaruntiisa Kumeel gaarka ee ku taala Caasimada Hirshabelle ee Jowhar ku ansixiyey Cod Furan oo u dhacay sida hoos kuxusan.

**Xildhibaanada Oggolaaday :** **56 (konton iyo lix) Xildhibaan**

**Xildhibaanada Diiday:** **(0) Xildhibaan**

**Xildhibaanada ka aamusay:** **(0) Xildhibaan**

Hadaba Waxaan Mudane Madaxweyne kaa codsanayaa inaad Xeer Madaxweyne ku Oggolaato **Sharciga Guddiga Madaxa-Bannaan shaqalaha Rayidka DG Hirshabelle 2018** (Sharci Lr.006) Si Waafaqsan qodobka 51aad Faqrada 12aad Dastuurka DGHSH Laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Dowlad Goboledka Hirshabelle si waafaqsan Qodobka 43aad Faqrada 1aad si uu u noqoto Sharci dhaqan gal ah.

**Sheikh Osman Barre Mohamed**

**Gudomiyaha Golaha Sharci Dejinta Dowlada Goboleedka Hirshabelle**

DOWLAD GOBOLEEDKA HIRSHABELLE
XAFIISKA GUDDOOMIYAHA BAARLAMAANKA HIRSHABELLE
ولاية اقليم هرشبيلي
مكتب رئيس مجلس النواب هرشبيلي
OFFICE OF THE SPEAKER
F.R.S. HIRSHABELLE STATE

E-mail: office.speaker@hirshabellestate.so | Mobile: +252615564141, +252615611016

# Qaraarka Golaha Sharci Dejinta Hirshabelle

**Tix:DGHSH/GSHDJ/017/18** **21^ka October 2018**

**DOWLAD GOBOLEEDKA HIRSHABELLE.**

**GOLAHA SHARCI DEJINTA DOWLAD GOBOLEEDKA HIRHSABELLE**

**QARAAR KUSAABSAN**

**Ansixinta Sharci Lr.5 ee Guddiga Madaxa-Bannaan ee Shaqalaha Rayidka Dowlad Goboledka Hirshabelle**

**JOWHAR 21,October ,2018**

**Baarlamanka Dowlad Goboledka Hirshabelle**

**Markuu arkay:** Qodobka 34aad Faqradiisa 1aad ee Dastuurka Dowlad Goboledka Hirshabelle.

**Markuu arkay:** Qodobka 28aad Faqradiisa 1aad & 2aad ee Dastuurka Dowlad Goboledka Hirshabbele.

**Markuu arkay:** Qodobka 33aad Faqradiisa 1aad ee Xeer Hoosadka Baarlamanka Dowlad Goboledka Hirshabelle.

**Markuu arkay:** Warqada Madaxweyne Dowlad Goboledka Hirshabelle tirsigeedu yahay DGHSH/XMM/N/0168/018 ee 15/08/2018 oo kusaabsan in la ansixiyo Hindise sharciyeedka Magaciisu kor kuxusan si loo dhameystiro Dhsimaha Guddiga Madaxa-Bannaan ee shaqaalaha Rayidka Dowlad Goboledka Hirshabelle.

**Markuu Dhageystay :** Warbixinta Guddiga shaqada shaqaalah Dhalinyarada iyo Isbortiga Baarlamanka Hirshabelle oo kusaabsaneyd falanqeynta Hindise sharciyedkan oo ku taariikhsan 21-10-2018.

**. GOLUHU WUXUU GUDDOONSADAY QODDOBADA HOOS KUXUSAN;**

**Qodobka 1aad**

Si waafaqsan Qodobka 33aad ee xeer hoosaadka Golaha sharci Dejinta oo xeerinayo Habraaca Ansixinta Sharciyada

Golaha Sharci Dejinta Kalfadhigii 4aad kulankiisa 18aad ee 21ka oktober 2018 oo ay goobjoog yihiin **56** Xildhibaan codeynaya waxay Hindise sharciyedka Guddiga Madaxa-Bannaan ee Shaqalaha Rayidka Hirshabelle (Sharci Lr.006) ku ansixiyeen Cod furan:

| | |
|---|---|
| Oggol: | 56 (konton iyo lix Xildhibaan) |
| Diiday: | 0 ( Xildhibaan) |
| Ka Aamustay: | 0 ( Xildhibaan ) |

**JOWHAR 21,October ,2018**

## Qodobka 2aad

**Meel Marinta Sharciga Lr.006 ee Guddiga Madaxa-Bannaan ee Shaqaalaha Rayidka**

Qaraarka Golaha oo ay kulifaaqan yihiin Dhamaan Dokumentiga kor kuxusan oo ah qayb qaraarkan kamid ah waxaa lagu soo saaraya xeer Madaxweyne Dowlad Goboledka Hirshabelle si waafaqsan Qodobka 51aad Faqrada 12aad ee Dastuurka Dowlad Goboledka Hirshabelle waxaana lagu soo saaraya faafinta Rasmiga ah ee Hirshabelle si waafaqsan Qodobka 43aad Faqrada 1aad ee Dastuurka Dowlad Goboledka Hirshabelle

**Lifaaqyada:**

- **Warqada Madaxweynaha Dowlad Goboledka Hirshabelle Lr. DGHSH/XMM/N/00168/018 ee 15-08-2018**
- **Warqada Wasiirka Shaqada iyo Arrimaha Bulshada Hirshabelle Ref.W/sh/sh/DGHSHS/2018 ee 06/08/2018**
- **Warbixinta Guddiga Shaqada iyo shaqada iyo shaqaalaha Dhalinyarada iyo Isbortiska Baarlamanka oo kusaabsaneyd falanqeynta Hindise sharciyedkan oo ku taariikhsan 21-10-2018.**

**M.ne Sh. Cusmaan Bare Maxamed**

**Gudoomiyaha Golaha Sharci Dejinta DGHSH.**

----------------------------

**Ansixinta Sharci Lr.006 ee Guddiga Madaxa Bannaan shaqalaha Rayidka DG Hirshabelle oo uu soo Gudbiyey Wasiirka Shaqada iyo Arrimaha Bulshada Xukuumada DG Hirshabelle**

| **Guddoomiyaha Golaha Sharci Dejinta Dowlad Goboledka Hirshabelle** | |
|---|---|
| Tirada Xubnahada Codeysay 56: Oggol(56) Diidmo(0) Ka aamustay(0) | |
| **Guddoomiyaha Golaha Sharci Dejinta**<br><br>Saxiixa Md.ne Sheikh Cusmaan Barre Mohamed | Taariikh 21th Oktober 2018 |

**JOWHAR 21,October ,2018**

Jamhuuriyada Federalka Soomaaliya

Dowlad Goboleedka Hirshabeelle

Xafiiska Madaxweynaha

جمهورية الصومال الفيدرالية

حكومة إقليم هير شبيلي

مكتب الرئيس

**Federal Republic of Somalia**

**Hirshabelle State**

**Office of the President**

---

**Ref: Ref: DGHSH/XMM/N/0168/18** **Tr: 15/8/2018**

**Ku: Guddoomiyaha Baarlamaanka Hirshabelle State Jowhar**

**Og. Gudd./ ku xigeenka 1aad Baarlamaanka Hirshabelle State Jowhar**

**Og. Gudd./ ku xigeenka 2aad Baarlamaanka Hirshabelle State Jowhar**

**Og. Madaxweyne ku xigeenka Dowladda Hirshabelle State Jowhar**

**UJEEDO: ANSAXINTA HINDISA SHARCIYEEDKA GUDDIGA SHAQAALAHA RAYIDKA ee DG HSS**

Mudane Guddoomiye waxaa Sharaf ii ah in aan kuu soo gudbiyo Nuqulka Hindisa sharciyeedka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee DG Hirshabelle oo ay Gollaha Wasiirada Hirshabelle cod Aqlabiyad ah ku ansaxiyeen taariikhdu markay ahayd 11/08/2018.

Waxaa rajeynayaa in Mudanayaasha Baarlamaanka Dowlad Goballeedka Hirshabelle ay ansaxin doonaan Hindisa Sharciyeedkan.

Mahadsanid,

XAFIISKA MADAXEYNAHA DOWLAD GOBOLEEDKA HIRSHABEELLE

مكتب الرئيس

OFFICE OF THE PRESIDENT

**Mudane: Maxamed Cabdi Waare**

**Madaxweynaha Dowlad Goballeedka Hirshabelle ee Soomaaliya**

Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya
Dowlad-Goboleedka Hirshabelle
Wasaaradda Shaqada iyo Arimaha Bulshada
Xafiiska Wasiirka

Federal Republic of Somalia
Hirshabelle State
Ministry of Labour & Social Affairs
Office of the Minister

جمهورية الصومال الفيدرالية
حكومة اقليم هـــيرشـــبيلي
وزارة العمل والشئون الإجتماعية
مكتـب الوزيـر

**Ref: W/Sh/Sh/DGHSHS/2018** **Date: 06/08/2018**

**Ku: Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Hirshabelle** **Jowhar**

**Og: Madaxweyne ku Xigenka Dowlad Goboleedka Hirshabelle** **Jowhar**

**Ujeeddo: Soo Gudbin Xeerka Gudiga Shaqaalaha Raydka ah ee DGHSH**

Sida caadiga ah waxa la gaaray xiligii la dar-dar geli laha Howlaha Dowlada.

Wasaarada Shaqada iyo Shaqaalaha Hirshabelle waxa ay idin horkeeneysa Xeerka Gudiga Shaqaalaha Raydka Ah ee Dowlad Goboleedka Hirshabelle, sidas darted waxa aan codsanaya in ay si hufan u ansixiyaan Golaha Wasiirada Dowlad Gobaleedka Hirshabelle si aan ugu gudbiyo Golaha Baarlamaanka Dowlad Gobaleedka Hirshabelle si ay u ansixiyaan, maa daama ay wax badan ay inooga xeran yihiin.

**Mahadsaniin**

**Ahmed Abdullahi Bashir**

**Wasiirka Shaqada iyo Arimaha Bulshada Hirshabelle**

**Saxiixa:** ____________

Email:wasaaradashaqadahir@gmail.com/molehirshabelle@gmail.com/karaama570@gmail.com
Tell: +252615152823/ +252616791172

**DOWLAD-GOBOLEEDKA HIRSHABELLE EE SOOMAALIYA**

# Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

# ee

# Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya

**Oktoobar 2018**

**Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda**

**Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya**

**TUSMADA QODOBBADA**


QAYBTA 1:GUUDMAR....10
1. Magaca Xeerka oo Gaaban....10
2. Hadafka Xeerka....10
3. Cidda lagu maamulayo....10
4. Erey-bixinta....10
QAYBTA 2: GUDDIGA SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE DOWLADDA....12
5. Doorka Guddiga....12
6. Madax-bannaanida Guddiga....12
7. Hawlaha Guddiga....12
QAYBTA 3: XUBNAHA UU KA KOOBAN YAHAY GUDDIGU....13
8. Doorka Xubnaha Guddiga....13
9. Soo xulidda Xubnaha Guddiga....13
10. Magacaabidda Xubnaha Guddiga....14
11. Cidda ka reeban qabashada xafiiska xubin ka tirsan Guddiga....15
12. Xaalado gaar ah oo la xiriira shaqada xubnaha ka tirsan Guddiga....15
13. Is-casilaadda Xubnaha Guddiga....16
14. Hawlgabka Xubnaha Guddiga....16
15. Ku-simeyaal Guddoomiyaha Guddiga....16
16. Shaqaalaha Guddiga....16
QAYBTA 4: HABRAACYADA GUDDIGA....18
17. Shirarka....18
18. Guddi-hawleedyada....18
QAYBTA 5: AWOODAHA GUDDIGA....18
19. Wareegtooyin iyo Xeer-nidaamiyeyaal....18
20. Hirgelinta Shuruucda....18
QAYBTA 6: WARBIXINNADA IYO XISAABTANKA....19
21. Warbixin-sanadeedda....19
QAYBTA 7: QODOBBO KALE....19
22. Sarreynta Xeerkan....19

## QAYBTA 1: GUUDMAR

### 1. Magaca Xeerka oo Gaaban

1.1 Xeerkan waxaa loogu yeeri karaa Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya.

### 2. Hadafka Xeerka

2.1 Hadafka Xeerkan laga leeyahay waa in lagu dhiso Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya waxaana ku jira qodobbo kahadlaya magacaabista, shuruudaha shaqaaleynta, xubnaha guddiga, awoodaha, habraacyada iyo hawlaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si waafqsan ee Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee Dowlad-goboleedka ee Hirshabelle Soomaaliya.

### 3. Cidda lagu maamulayo

3.1 Xeerkan waxaa lagu maamulayaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowlada iyo Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya.

### 4. Erey-bixinta

4.1 Xeerkan dhexdiisa, haddii xaaladdu aaney si kale ka dhigeynin fasiraadahan soo socda ayaa la raacayaa:

***b) "Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed"*** waxaa loola jeedaa qof u shaqeeya Hay'ad Loo Shaqeeyo oo mushaarkiisa laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka e Hirshabelle e Soomaaliya sida ay dhigeyso faqradda 4.1e.

***t) "Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda"*** waxaa loola jeedaa Shaqaalaha Rayidka ee Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladdu waxaa ay si waafaqsan qodobbada xeerkan u qabtaan dhammaan hawlaha fulinta iyo kuwa maamul iyo adeeg-bixinta ee Dowladda.

***j) "Guddiga"*** waxaa loola jeedaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ee lagu dhisey Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

***x) "Miisaaniyadda Mideysan"*** waxaa loola jeedaa Maaliyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaliya ee lagu qeexay Qodobka 4aad ee wareegtada lagu dhisey Wasaaradda Maaliyadda ee Dowlad-goboleedka ee Hirshabelle Soomaaliya.

***kh) "Madax-Waaxeed"*** waxaa loola jeedaa waax heerkeedu gaarsiisan yahay Agaasime.

***d) "Xeer la diidi karo"*** waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiye uu Baarlamaanku u haysto muddo cayiman oo uu kaga soo horjeesan karo (diidi karo) ka hor inta *Xeer-nidaamuyuhu* dhaqangal noqon.

***r) "Qof Shaqaale ah"*** waxaa loola jeedaa Qof Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed ah oo ay shaqaaleysatey Hay'ad Loo Shaqeeyo.

***s) "Hay'ad Loo Shaqeeyo"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad, wakaalad ka tirsan Wasaarad, ama Guddi Madax-bannaan Dowlad-goboleedka ee Hirshabelle Soomaaliya ka mid ah oo shaqaaleysta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

***sh) "Shaqaalaha"*** (*Establishment*) waxaa loola jeedaa wadarta tirada iyo darajooyinka jagooyinka maaliyad ku leh Miisaaniyadda.

***dh) "Qandaraas Muddo Go'an"*** (*Fixed-term Contract*) waxaa uu macnaheedu yahay qandraas shaqaaleyn oo qof la siiyo oo muddo cayiman oo xaddidan leh..

***c) "Dowladda"*** waxaa loola jeedaa Hirshabelle ee lagu dhisey Oggolaanshaha Dowladda Federaalka ee Soomaaliya ama Dowlad-goboleed Xubin Ka ah Federaalka oo waqtigaa ka dib la dhiso..

***g) "Dowlad-goboleedka*** Hirshabelle**"** waxaa loola jeedaa Dowlad-goboleedka Xubin ka ah Federaalka ee markaa ka dib la dhisay.

***f)"Madaxa Hay'adda Loo Shaqeynayo"*** waxaa uu macnaheedu yahay Agaasimaha Guud (Xoghayaha Joogtada ah) ee Wasaarad ama sarkaal gacanta ku haya hawlaha fulinta ee Hay'adda Loo Shaqeynayo

***q) "Tilmaammo/amarro"***waxaa loola jeedaa xeerar, buugaag, amarro, dhabbe-tuseyaal iyo ogeysiisyo waxaana soo saara Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda oo u amraya Guddoomiyaha Guddiga. Tilmaamaha (amarrada) waxaa ay caadi ahaan ay tahay in islamarkaa ama waqti cayiman lagu fuliyo..

***k) "Maareeye"*** waxaa loola jeedaa qofka sida tooska ah uu u hoos tago Qofka ka tirsan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

**l) "Xulasho aqoon iyo karti ku dhisan"** Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda oo lagu shaqaaleeyo laguna dalacsiiyo aqoontooda iyo kartidooda waxaa uu macnaheedu yahay in:

1-dhammaan xubnaha bulshada ka mid ah ee xaq u leh oo la siiyo fursad caqligal ah oo ay ku soo codsadaan in ay qabtaan hawlaha u habboon;

2-loo kuurgalo sida ay kuwa soo codsadey uga soo bixi karaan hawlaha u habboon shaqada;

3- u-kuurgeliddaas sal looga dhigo sida ay aqoonta iyo kartida qofka shaqada soo codsadey iyo aqoonta iyo kartida caadi ahaan loogu baahan yahay hawsha; iyo

4- loo kuurgalo sida ilaa xad uu qofku ugu habboon yahay shaqada oo noqota arrinta aasaasi ahaan lagu saleynayo go'aanka la qaadanayo.

***m) "Wasiir"*** waxaa loola jeedaa xubin ka mid ah Golaha Wasiirrada.

***n) "Wasaarad"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad ka mid ah Laanta Fulinta ee la dhisey iyada oo la raacayo dastuurka Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya.

***w) "Qandaraas ay muddadiisu furan tahay"*** waxaa loola jeedaa qodaraas shaqaale oo qoran oo aan lahayn taariikh go'an oo uu dhammaanayo.

***h) "Xeer-nidaamiye"*** waa *xeer la diidi karo* oo bixinaya xeerar faahfaahsan oo uu diyaariyo uuna soo saaro Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si loogu hawlgeliyo waxyaabaha uu dhigayo Xeerkan. Xeer-nidaamiyeyaashan waa kuwo ay waajib tahay in loo hoggaansamo laakiin ma aha Xeer uu soo saarey Baarlamaanka.

***y) "Mushaar"*** waxaa loola jeedaa ujuurada Qofka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda la siinayo iyada oo looga beddelanayo hawsha uu qabtey.

## QAYBTA 2: GUDDIGA SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE DOWLADDA

**5. Doorka Guddiga**

5.1 Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya waxaa loo dhisey in uu kormeero habsami u shaqeynta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya iyo in uu hubiyo in Shaqaalaha Rayidku ah ay hawshoodu tahay mid hufan oo waxtar leh marka ay u shaqeynayaan bulshada, iyo in lagu fulin karo kheyraadka miisaaniyadeed ee degaannada dowlad-goboleedka, ayna shaqadoodu sal u tahay aqoon iyo karti iyo fursad loo simanyahay.

**6. Madax-bannaanida Guddiga**

6.1 Guddigu waa uu u madax-bannaan yahay hawshiisa.

**7. Hawlaha Guddiga**

7.1 Guddigu waxaa ay mas'uuliyaddiisu noqoneysaa:

b) Hubinta in si habboon loo hirgeliyo Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

t) Dejinta siyaasadaha, xeerarka iyo dhabbe-tuseyaasha loogu baahan yahay hirgelinta Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyo hubinta ku-dhaqankooda

j) In uu hayo diiwaanka xogta jago'/shaqaale kasta oo ay leedahay hay'ad maamul oo kasta oo miisaaniyad loo ansaxiyey

x) In uu hayo diiwaanka xogta dhammaan shaqaalaha u shaqeeya dowlad gooleedka, jagooyinka loo qaatey, iyo mushaarkooda.

kh) Isuduwidda shaqaaleynta, dalacsiinta, iyo beddelidda Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

d) In isaga iyo Wasaaradda Maaliyadda ee Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya oo wadajira, talooyin ay Golaha Wasiirrada ka siiyaan tirada iyo heerarka darajooyinka shaqaalaha hay'adda Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyo mushaaraadka, gunnooyinka iyo xuquuqaha kale ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyaga oo ku xisaabtamaya xaaladaha dhaqaale iyo culeysyada miisaaniyadeed ee jira.

r) Wax ka qabashada arrimaha culus ee la xiriira anshaxa

s) Wax ka qabashada cabashooyinka ka yimaada Shaqaalaha Rayidka ah ee dowladda

sh) Diyaarinta warbixin sanadle ah oo ku saabsan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

## QAYBTA 3: XUBNAHA UU KA KOOBAN YAHAY GUDDIGU

**8. Doorka Xubnaha Guddiga**

8.1 Guddigu waxaa uu ka koobnaanayaaa Guddoomiye iyo Labo Guddoomiye-ku-xigeen oo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda leeyahay.

8.2 Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa uu mas'uul ka ahaanayaa maamulka guud ee Guddiga iyo Xoghayntiisa waxaana uu guddoominayaa shirarka rasmiga ah ee Guddiga.

8.3 Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa uu mas'uuliyad fulineed u kala dhiibayaa Labada Guddoomiye-ku-xigeen.

8.4 Xubnaha Guddiga Shaqaalaha waxaa ay waajibaadkooda u gudan doonaan si madax-bannaan oo dhexdhexaadnimo ku dheehan tahay oo waafaqsan shuruucda dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya. Xubnaha Guddigu waxaa ay hawshooda gudanayaan iyaga oo la-tashanaya oo kaashanayana Golaha Wasiirrada si waafaqsan qodobka 61aad faq ( 1aad & 2aad) dastuurka hirshabelle waxaana ay mar kasta ilaalin doonaan danaha, sharafta iyo sumcadda Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya. Go'aamada Guddigu waxaa lagu saleyn doonaa kartida/aqoonta qofka iyada oo aan cidna lagu takoorin sababo ay ka mid yihiin dheddig/lab ahaansho, sinji, luuqad, qabiil, diin, siyaasad uu taageersan yahay ama fikir kale, hanti, ama dhalasho.

**9. Soo xulidda Xubnaha Guddiga**

9.1 Xubnaha Guddiga waxaa lagu soo xulayaa geeddi-socod tartan daahfuran oo ay isku soo duweyso Wasaaradda Xafiiska Madaxweynaha. Geeddi-socodka soo-xulidda waa in lagu soo xulaa saddex tartame oo u qalma mid kasta oo ka mid ah Jagooyinka Guddoomiyaha iyo Labada Guddoomiye-ku-xigeen ee Guddiga. Madaxweynaha Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya ayaa saddexda tartame ee liiskooda loo soo gudbiyey ee jago kasta mid uga soo xulaya una kala magacaabaya Guddoomiyaha Guddiga iyo Guddoomiye-ku-xigeennada

9.2 **Xubnaha Guddiga waxaa loo soo xuli doona si ka tarjumeysa danaha kala duwan ee dadka Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya. Ugu yaraan mid ka mid ah saddexda Xubnood ee Guddiga waa in ay haween ahaataa.**

9.3 Guddoomiyaha iyo Labada Guddoomiye-ku-xigeen ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in ay ahaadaan muwaadiniin reer hirshabelle ah oo leh akhlaaq wanaagsan iyo waayo-aragnimo ama aqoon xirfadeed.

**10. Magacaabidda Xubnaha Guddiga**

10.1 Xubnaha Guddiga waxaa loo magacaabayaa in ay xilka hayaan muddo shan (5) sano oo buuxda ah, oo la cusbooneysiin karo. Waxaa mushaarkoodu noqon doonaa heerka uu ku soo taliyo Wasiirka Maaliyadda ayna oggoladdan Golaha Wasiirrada.si waafaqsan qodobka 61aad faq 3aad ee dastuurka

10.2 Magacaabistooda ka dib, Xubnaha Guddigu waxaa ay muujin doonaan doonistooda ku aaddan in ay waajibaadka jagada ka soo bixi doonaan iyaga oo la marinayo dhaartan soo socota:

*"Waxaan ku dhaaranayaa ama iga daacad ah in aan marka aan gudanayo hawlaha la igu aaminey aniga oo ah Xubin Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda aan waajibaadkeyga u guto si madax-bannaani iyo dhexdhexaadnimo, oo waafaqsan shuruucda Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya, iyo iyada oo aan cidna lagu takooreyn sabab kasta. Waxaan la tashan doonaa oo aan kaashan doonaaa Golaha Wasiirrada waxaana aan mar walba ilaalin doona danaha, sharafta iyo sumcadda Dowlad-goboleedka Hirhabelle ee Soomaaliya." Waxaan ku dhaaranayaa magaca ilaahey in aan xilkeyga u gudanaya si daacad ah oo danta, diinta, dadka iyo dalka ku jirta dhowrayana dastuurka dowlad gobaleedka hirshabelle iyo kan qaranka iyo shuruucda kale ee dalka.*

10.3 Ka dib marka la mariyo dhaartan kore, xubin kasta oo ka tirsan Guddiga waa in ay saxiixdaa dhaarta oo qoraal ah, taas oo lagu dhigayo Wasaaradda Xafiiska Madaxweynaha.

10.4 Haddii, ay dhacdo in waqti un, uu guddiga shaqada iyo shaqaalaha baarlamaanka DGHSH helo caddeyn ah in mid ka mid ah xubnaha Guddiga uu ka soo bixi waayey shuruudaha lagu faahfaahiyey Xeerkan, Madaxweynuhu Guddiga waxaa uu xubintaa u gudbinayaa arinteeda baarlamaanka DGHSH si uu xilka ugu qaado baarlamaanka kaqaadi karaa xilka xafiiska waxaana madaxweynaha kadib uu u magacaabi karaa cid kale oo beddesha, iyada oo loo marayo geeddi-socod shaqo-qoris ku saleysan aqoonta iyo kartida qofka iyada oo laga ambaqaadayo Qodobka 9aad ee Xeerkan.

10.5 Guddoomiyaha Guddiga ayaa ka mas'uul ah maareynta hawl-qabadka Guddoomiye-ku-xigeennada. Haddii uu Guddoomiyaha Guddigu uu dhaliilayo hawl-qabadka Guddoomiye-ku-xigeennada, waa in uu dhaliilahaa marka hore kala hadlo Guddoomiye-ku-xigeennada si waafaqsan Xeer-nidaamiyeyaal uu soo saarayo Wasiirka Xafiiska Madaxweynaha. Haddii dhaliilaha la xiriira hawl-qabadka la xallin waayo waa in arrinta loo gudbiyaa Madaxweynaha oo ka qaadi kara tallaabo waafaqsan Faqradda 10.4 ee Xeerkan.

10.6 Haddii ay dhacdo in xil-gudasho la'aan, is-casilaad ama geeri ku timaaddo xubin, Madaxweynaha waa in uu Guddiga u magacaabaa xubin cusub oo beddesha xubintaa, si waafaqsan Xeerkan.

**11. Cidda ka reeban qabashada xafiiska xubin ka tirsan Guddiga**

11.1 Qof ma noqon karo, mana sii ahaan karo, xubin ka tirsan Guddiga, haddii qofkaa uu yahay:

b) xubin ka tirsan Baarlamaanka; ama wasiir

t) xubin ka tirsan Gole Gobol; ama

j) xubin ka tirsan Gole Degaan; ama

x) qof xafiis ka haya xisbi siyaasadeed oo diiwaangashan; ama

kh) qof aan caqligiisudhammeyn sida uu tilmaamo sharci la xiriira ilaalinta qofka iyo hantida qofka aan caqligiisu dhammeyn; ama

d) qof ku xukuman xabsi toban iyo laba bilood ama ka badan ah.

**12. Xaalado gaar ah oo la xiriira shaqada xubnaha ka tirsan Guddiga**

12.1 Xubnaha Guddiga waa in aaney:

b) si firfircoon ugu lug yeelan siyaasad; ama

t) si waafaqsan Faqradda 12.2 aan si toos ah ama si aan toos ahayn uga lug yeelan maamulka ama kantaroolka sharikad; ama

j) si waafaqsan Faqradda 12.3, haddiyad ku helin ama si kale ku helin, oggolaan ama helin faa'iido kale oo wax u dhimi karta amaanadoooda oo aan ahayn waxa lagu siiyo shaqada ay Guddiga u hayaan.

12.2 Waxyaabaha lagu sheegey 12.1 (b) ama (t) kama hor-istaagayaan xubnaha Guddiga in ay qabtaan xafiis:

b) urur/hay'ad xirfadeed oo ay aqoontooda u habboon tahay; ama

t) ay Soomaaliya u magacowdo sharikad ay Soomaaliya dano maaliyadeed ku leedahay

1- dano maaliyadeed oo toos ah ama aan toos ahayn aan xubinta lagu siineyn magacaabista; ama

2- faa'iido kasta oo maaliyadeed oo toos ah oo ay xubinta ku hesho magacaabistaa uu isagu ku daro Sanduuqa Mideysan ee Dakhliga.

12.3 Si waafaqsan sida uu dhigayo Sharciga Soomaaliya, Xubin Guddiga ka tirsan waxaa ay iibsan kartaa, kireysan kartaa ama si kale u heli kartaa dhul si la mid ah iyo si waafaqsan shuruudaha ku xiran muwaadin kasta oo kale.

## 13. Is-casilaadda Xubnaha Guddiga

13.1 Xubin ka tirsan Guddiga waxaa ay isku casili kartaa iyada oo bixisa ogeysiis bil ah oo ay arrinta ay damacsan tahay ugu sheegeyso Madaxa Dowlad-goboleedka.

## 14. Hawlgabka Xubnaha Guddiga

14.1 kuma jirto qofka ay da'diisu gaarto 75 sano waa in aan loo magacaabin ama dib loogu magacaabin Xubin Guddiga ka mid ah waana in aan loo magacaabin ama dib loogu magacaabin muddo dhaafsiisan taariikhda qofkaasi uu gaarayo 75 sano jir.

## 15. Ku-simeyaal Guddoomiyaha Guddiga

15.1 Madaxweynaha, ayaa si waafaqsan talada uu siiyo Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda, waxaa uu mid ka mid ah Guddoomiye-ku-xigeennada Guddiga u magacaabi karaa in uu ku-sime ahaan u noqdo Guddoomiyaha Guddiga, ama u magacaabi kara qof aqoontii iyo kartidii looga baahnaa leh noqdo ku-sime Guddoomiye-ku-xigeenka Guddiga:

b) marka ay jagadu ku bannaanaato is-casilaad, hawlgab, shaqo-ka-joojin ama geeri ku timaadda Xubnaha Guddiga; ama

t) marka mid ka mid ah xubnaha Guddiga uu waajibaadyadiisa u gudan waayo xanuun ama dhaawac ba'an daraaddii, ama

j) marka mid ka mid ah Xubnaha Guddiga uu ku maqnaanayo fasax ka badan 3 bilood

15.2 Qof ku-sime ahaan xubinnimada Guddiga ku qabta sida ay tilmaamayso faqradda 15.1 a) iyo b) waxaa uu jagadaas ku-sime ahaan u hayn karaa ugu badnaan lix (6) bilood marka laga reebo in uu Madaxweynaha oo raacaya talada Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladd uu ansaxiyo iyo keliya muddada ay dad ku qaadaneyso in lagu magacaabo qof u qalma oo buuxiya jagada bannaan, ama ilaa xubinta Guddiga uu shaqadiisa dib ugu soo noqonayo

15.3 Qof ku-sime ahaan xubinnimada Guddiga ku qabta sida ay tilmaamayso faqradda 15.1 a) iyo b), waxaa uu qaadanayaa mushaar u qalma darajada iyo heerka ku habboon doorkaaas, iyo keliya muddada uu ku-sime ahaan u hayo jagadaas. Qofka ku-sime ahaan u haya doorka waxaa laga filayaa in uu doorka uga soo baxo sida laga rabo iyo in lagula xisaabtamo natiijooyinka lala xiriiriyo jagada.

15.4 Guddoomiyaha Guddiga waxaa uu mid ka mid ah Guddoomiye-ku-xigeennada u magacaabi karaa in uu ku-sime ahaan u noqdo Guddoomiyaha Guddiga, ama waxaa uu qof u qalma u magacaabi karaa in uu ku-sime u ahaan u hayo doorka Guddoomiye-ku-xigeenka Guddiga marka mid ka mid ah Guddoomiye-ku-xigeennada uu qorsheynayo in uu shaqada uga maqnaado fasax caadi ah oo ka yar 3 bilood.

**16. Shaqaalaha Guddiga**

16.1 Guddiga waxaa taageeri doona Xoghayn. Shaqaalaha Xoghaynta waxaa ay noqon doonaan Shaqaale Rayid ah ee Dowladeed waxaana lagu shaqaaleyn doonaa si waafaqsan shuruudaha uu u dejiyey Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

16.2 Tirada iyo heerka jagooyinka Xoghaynta waxaa go’aaminaya Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyo wasaaradda shaqada iyo shaqaalahaiyaga oo Wasaaradda Maaliyadda kala tashanaya sida miisaaniyad loogu heli karo.

Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka ee Hirshabelle Soomaaliya ayaa maaliyad siin doonta Guddiga iyo Xoghayntiisa. Miisaaniyadda Guddiga waxaa lagu go’aaminayaa geeddi-socodka miisaaniyad-sanadeedka.

## QAYBTA 5: HABRAACYADA GUDDIGA

**17. Shirarka**

17.1 Guddigu waxaa uu shirar yeelanayaa ugu yaraan bil walba si uu uga fekero oo uu uga heshiiyo siyaasadda iyo xeerarka, si uu dib ugu eego codsiyada iyo kiisaska anshax-marinta ah uuna u tixgeliyo arrimaha la xiriira in si habboon loo hirgeliyo Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda. Ugu yaraan laba ama saddex xubnood oo Guddiga ka mid ah waa in ay goob-joog ahaadaan si uu shir u dhici karo.

**18. Guddi-hawleedyada**

18.1 Guddigu waxaa uu dhisi karaa guddiyo hawleed iyo guddiyo wada-tashi oo ka talo-bixiya siyaasadaha loo maareynayo shaqaalaha rayidka ah ee dowladda.

## QAYBTA 5: AWOODAHA GUDDIGA

**19. Wareegtooyin iyo Xeer-nidaamiyeyaal**

19.1 Guddigu waxaa uu dejin karaa soona saari karaa **Xeer-nidaamiyeyaal** iyo **Tilmaamo/amarro** lagama maarmaan u ah hirgelinta qodobbada Xeerkan iyo Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

**20. Hirgelinta Shuruucda**

20.1 Si loo hubiyo in si habboon loo hirgeliyo Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee dowladda iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa iyo tilmaan-bixintiisa iyo amarradiisa, Guddigu waxaa uu shaqaalaha Xoghaynta u oggolaan karaa in ay:

b) Booqdaan meel kasta oo ay ka shaqeeyaan shaqaale maamul/dowladeed oo rayid ah si ay u kormeeraan xaaladaha shaqada

t) Baaraan diiwaannada qoran ee la xiriira shaqo-qorista iyo shaqaaleynta shaqaalaha rayidka ah ee dowladda

j) Wareystaan shaqaalaha rayidka ah ee dowladda

20.2 Guddiga waa in uu muddo ogeysiin loogu talogaley oo caqligal ah siiyaa shaqaalaha taas oo uugu sheegayo in uu damacsan yahay in uu soo booqdo goob shaqo, uu baaro xogta qoran ama uu qaado wareysiyo.

## QAYBTA 6 : WARBIXINNADA IYO XISAABTANKA

**21. Warbixin-sanadeedda**

21.1 Muddo saddex bilood oo ka bilaabata dhammaadka sanadka gudaheed waa in Guddigu ku soo saaraa (nashriyaa) warbixin-sanadeed ay ku jiraan macluumaad ku saabsan:

b) Hawlihii uu Guddigu qabtey muddadii sanadka ahayd

t) Tirada Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee dowlad-goboleedka, darajooyinkooda, tirada ragga iyo dumarka ah shaqaale dowladeed iyo darajo kasta, iyo xog ku saabsan shaqo-qorista, hawlgabka, is-casilaadda, beddelaadda, codsiyada, anshax-marinta iyo eryiddaba.

j) Guddigu waxaa uu soo saari karaa warbixinnada kale ama dokumentiyada kale ee uu muhiim u arko

## QAYBTA 7: QODOBBO KALE

**22. Sarreynta Xeerkan**

22.1 Xataa haddii uu jiro sharci macne kan ka soo horjeeda dhigaya, qodobbada Xeerkan ayaa ka sarreeya. Xeer kasta oo ka soo horjeeda Xeerkanna wax baa la beddeli si loo waafajiyo qodobbada Xeerkan.

